

Wuxuu dambigi Addan soo saaray

Casharkii 8aad

Qeebta Kowaad

Nabad korkiina ha aahato saxiibada ina dhageysan hayaan. Waxaan idinku salaamaya magaca Eebbe nariix guud iyo midba garaaab naxariistaa. Waxaynu ku faraxsan nahay in aan idin soo bandhigno barnaamijkeena jidka xaqnimada.

Aqoon koorarsigeen ee buuga Toraad, waxaynu ka baranay in waqtigii bilowgii u ilaahay abburay dadka addunka ugu horayay. Ilaahay wuxuu doonayay in aay addecan, qalbigooda, iyo maskaxdooda iyo wixii kaloo lamid ah, si ay ula haddan xiriir guud oo suban.

Waxaynu araagnay siduu ilaahay u tijaabiyay adam, taasi wuxuu ogan rabay in u hadalkiisa adeeci doono mise in kale. Intaynan la abburin haweenayda ugu horay. Rabbiga wuxuu amray Adan: Naagtiina wuxuu ku yidhi, Dhibtaada iyo wallacaaga aad baan u badin doonaa; oo dhib baad carruur ku dhali doontaa; oo waxay doonistaadu ahaan doontaa ninkaaga, wuuna kuu talin doonaa. 17Aadanna wuxuu ku yidhi, Codkii naagtaadaad maqashay oo waxaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray, anigoo leh,

Waa inaad waxba ka cunin, sidaas daraaddeed dhulku waa habaaran yahay adiga aawadaa; maalmaha cimrigaaga oo dhanna dhibaataad wax kaga cuni doontaa (Bilowgii 2:16-17). Ilaahay wuxuu tijaabiyay Nabi Adan, wuxuuna uga digay in abaalmarinta caasinimada ay tahay dhimaasho, iyo kala tagid. Ilaahay aad buu u jeclaa Nabi Adan. Wuxuuna doonay in u xiriir suban la lahaado una hajido adeecida Rabbiga. Hase yeeshe, barnaamijka aan soo daafnay waxaynu ka aqrinay in Adan iyo Xawo ay shaydanka dhageysteen oona ku caasiyeen Raabiga taaso la xiriirta Geediki aqoonta iyo noolasha.

Manta waxaynu ku guuda jirnaa waxbarashadii buuga Torraadka, cutubka seddax ee bilowgi. Waxaynu arki doona wixii dhacay markay Adan iyo Xawa ay dambabeen.

Oo labadoodiiba indhahoodii way furmeen, oo waxay garteen inay qaawan yihiin; waxayna isku tosheen caleemo berde, oo ay gunti ka samaysteen (Bilowgi 3:7).

Shayga kowaad ay Adan iyo Xawa sameeyeen markay erayga ilaah diideen? Waxay isku dayeen in ay daboolan ceebtooda iyo qirashada dambiga ay sameeyen. Waxaynu baranay inta aysan Adan iyo Xawa ay cunin geedikii lagu kala garanayay wanaagsan iyo xumanta, iyagu waay qaawanaayeen, wax ceeb ah maysan dareemi jirin. Ilaahay fikirkooda xagga jirkooda wuu badalmay. Waxay qirteen ceeb dambiga ay faleen awgeed.

Waxaa kaloo aynu leenahay buuga toraadka wuxuu leeyahay: Oo waxay maqleen codkii Rabbiga Ilaaha ah, isagoo beerta dhex socda kolkii maalintu qaboobayd: oo ninkii iyo naagtiisii way iska qariyeen Ilaah, oo waxay ku dhuunteen geedihii beerta dhexdooda (Bilowgi 3:8).

Qeebti Labaad

Ilaah waa xaaq soora, wuuna xukumay Adan iyo Xawa dambigii ay faleen awgiis. Sidaas daraadeed ayan uga araagnaa aaydani oo leh: *Oo Rabbiga Ilaah ahu wuu u yeedhay ninkii, oo wuxuu ku yidhi, Xaggee baad joogtaa? (3:9).*

Ilaahay muxuu sameeyay marku Adan dambaabay? Adan buu u yeedhay. Wuxuu isku dayay in u ilaahay iska qaariyo! Wuxuu rabbiga ugu yeedhay Adan? Wuxuu doonayay in Adan u qiirto dambigiisa ilaah hortisa. Rabbiga weli wuu jecal yahay Adan. Inkastoo u erayga ilaahay diiday oo ahaa in uusan cunin geeda ku jaalo janaada dhexdeeda.

Jawaabta Adan waxay ahayd sida tan, halkeed joogta? Toraadka wuxu leeyahay:

Isagiina wuxuu yidhi, Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday, maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo waan isqariyey. Kolkaasuu ku yidhi, Yaa kuu sheegay inaad qaawan tahay? Miyaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray inaad wax ka cunin? Ninkiina wuxuu yidhi, Naagtii aad i siisay inay ila joogto ayaa geedkii wax iga siisay, oo anna waan cunay. Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu

naagtii ku yidhi, Waa maxay waxan aad samaysay? Naagtiina waxay tidhi, Abeesadaa i khiyaanaysay oo anna waan cunay (Bilowgi 3:10-13).

Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu abeesadii ku yidhi, Waxan aad samaysay aawadiis waad ka habaaran tahay xoolaha oo dhan, iyo dugaag kasta oo duurka jooga; waxaanad ku socon doontaa boggaaga, ciid baanad cuni doontaa maalmaha cimrigaaga oo dhan: oo colaad baan idin dhex dhigi doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda; oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad burburin doontaa. Naagtiina wuxuu ku yidhi, Dhibtaada iyo wallacaaga aad baan u badin doonaa; oo dhib baad carruur ku dhali doontaa; oo waxay doonistaadu ahaan doontaa ninkaaga, wuuna kuu talin doonaa. Aadanna wuxuu ku yidhi, Codkii naagtaadaad maqashay oo waxaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray, anigoo leh, Waa inaadan waxba ka cunin, sidaas daraaddeed dhulku waa habaaran yahay adiga aawadaa; maalmaha cimrigaaga oo dhanna dhibaataad wax kaga cuni doontaa. Qodxan iyo yamaarugna waa kaaga soo bixi doonaan, waxaanad cuni doontaa geedaha yaryar oo duurka.